

xiro qoroshada shaqaalaha laakiin aan shaqada wax xiriir ah laheyn kuna saleysan midabka, qowmiyadda iyo halka ay asal ahaan ka soo jeedaan dadka soo codsanaya.

- ◁ Dastuurku waxa uu dawladda ka mamnuucayaa in si xun laguula dhaqmo midabkaaga, qowmiyadaada ama halka aad ka soo jeedo asal ahaan darteed.

Heyb sooc ku dhisan midabka, qowmiyadda ama halka qofku ka soo jeedo ee guryaha

Tusaalooyin heyb sooc ku dhisan midabka, qowmiyadda ama halka qofku ka soo jeedo ee guryaha

- ◁ Haddii aad codsato in aad kireysato ama iibsato guri oo lagu sheego in guryaha aan laga kireyneyn ama iibineyn dadka madow.
- ◁ Kireeyayaasha iyo deyn bixiyayaasha ayaa laga yaabaa in ay soo saaraan xeerar si aan cudurdaar laheyn ama aan loo sineyn u dhaawacaya qowmiyad gaar ah ama meel kaliya ka soo jeeda. Tusaale ahaan, haddii la diido codsigaaga deynta waayo qowmiyadaada darteed ama hay'addu diido in ay deyn ku siiso ama ceymisku diido waayo guriga ayaa ku yaal xaafad gaar ah ama ceymiska aan lagu siin qodobdo lamid ah kuwa lagu siiyo dadka kale ee la midka ah.

Xuquuqdaada:

- ◁ Sharciga Helitaanka iyo Qeybinta Guryaha ee dadka u siman yahay waxa uu mamnuucayaa heybsooca kirada iyo deynta. Sharciga u Sinaashaha Deyn Qaadashada waxa uu mamnuucayaa heyb sooca deynta. Labada sharciba waxa ay mamnuucayaan heyb sooca ku dhisan midabka, qowmiyadda iyo halka qofku ka soo jeedo asal ahaan.
- ◁ Sharciyada ilaalinta xuquuqda aadanaha ee gobolka iyo kuwa degaanka ayaa mamnuucaya heyb sooca guryaha.

Heyb Sooc Ku Dhisan Midabka, Qowmiyadda ama Halka Qofku Ka Soo Jeedo ee dugsiyada iyo kuliyadaha

Tusaalooyin heyb sooca dugsiyada iyo xeryaha kuliyadaha

- ◁ Kala saarista fasalada ama xafladaha ay dugsiyadu qabtaan oo ku dhisan heyb sooc midabka, qowmiyadda iyo halka uu qof ahan ka soo jeedo.
- ◁ Adeegga luqadaha ee dadka baranaya afka Ingiriisiga.
 - Ciqaab loo geysto koox ardayda ka mid ah oo ku saleysan midabka, qowmiyadda iyo halka uu qof ahaan ka soo jeedo.
 - Adeeg kala duwan oo loo qabto taasoo ku saleysan midabka, qowmiyadda iyo halka uu qof ahaan ka soo jeedo.
- ◁ Qashqashaad ama faduul loo geysto kuna saleysan midabka, qowmiyadda iyo halka uu qof ahaan ka soo jeedo.
- ◁ Ardayda oo bar tilmaameed looga dhigto kuna saleysan midabka, qowmiyadda iyo halka uu qof ahaan ka soo jeedo.

Xuquuqdaada:

- ◁ Sida uu dhigayo sharciga VI ee Sharciga Madaniga, waxa uu mamnuucayaa heyb soo ku dhisan midabka, qowmiyadda iyo halka uu qofku ka soo jeedo asal ahaan looguna diido barnaamijyada

iyo adeegga dadaweynaha. Taas waxaa ka mid ah adeegga dugsiyada iyo kuliyadaha gargaarka ka hela Wasaaradda Waxbarashada ee Mareykanka (Fiio gaar ah: qaar ka mid ah dugsiyada gaarka ah lama siiyo gargaarka dawladda dhexe, sidaa darteed Sharciga VI ma khuseeyo).

- ◁ Goobta waxbarashada ee aad dhigato waa in ay ka jawaabaan xaaladaha heyb sooca ah ama qashqashaadda ah ee ku saleysan midabka, qowmiyadda, iyo halka qofku ka soo jeedo qof ahaan ee laguugu diido in aad ka qeyb qaadato ama aad ka faa'iideysato barnaamijyada waxbarashada iyo dhaqdhaqaaqa la xiriira.